

Maka yartahay 18sano? Talyaaniga ma kaligaa ayaa ku nool?

Waxaad xaq u leedahaya:

- in aanan lagaa masaafurin wadanka Talyaaniga;
- in aanan lagu geyn Kaamamka dadka waa weyn;
- in aad la noolaato familkaaga ama xubin qoyskaaga kamid ah si ay kaaga taxadiraan;
- in aad ku noolaato Kaam ama xeryaha caruurta waxaadna ka heli kartaa daryeel, cunto, meel aad seexato, waxbarasho, in lagu daweyyo (Haddii aad dooneyso daweyn);
- in aad hesho sharci ama degenaanshaha wadankan talyaaniga;
- in aad fikradaada dhiiban karto iyo in laguugu sheego xuquuqdaada luqadaada hooyo;
- in aad hesho qof ilaaliye kuu noqda oo mas'uul ah, maxkamadda ayaa go'aaminaya qofka ku matali doona sharci ahaan;

Sidee ku xaqiijin kartaa in aad ka yartahay 18sano?

Waa in aad kalsooni ku qabtaa dowladda Talyaaniga, tusi dokumenti ama aqoonsi si loo ogaado qofka aad tahay. Haddii aad isticmaasho dukumeentiyo ama sharci been ah dowladda Talyaaniga dambiile ayay kuu aqoonsani. Haddii aadan haysan wax sharci ah ama aqoonsi ah, laakiin ay familkaaga kuusoo diri karaan, fadlan noo sheeg si aan kaaga caawino oo aad u hesho aqoonsigaaga. Haddii aadan haysan wax dukumeenti ah ama aqoonsi ah, xittaa waddankaaga, koox xirfadlayaal ah ama Guddi u tababaran howshaa, ayaa qiimeyn doona da'daada si loo caddeeyo inaad ka yar tahay 18 sano. Haddii Guddigu uu ku dhawaaqo inaad ka weyn tahay 18 sano waxaad heli kartaa amar ah inaad ka baxdo Talyaaniga ama waxaa laguugu diri karaa xarun loogu talagalay dadka waaweyn ee soogalootiga ah. Markaad halkaas joogtid, shaqaalaha u sheeg wixii kugu dhacay, haddii aad ka yartahay 18 sano waydiiso gargaarkooda si loo caddeeyo da'daada dhabta ah.

Ka waran haddii boolisku faraha kaa qaado?

Talyaaniga iyo wadama Yurub, sharciga u yaala ayaa sheegaya in qof kasta oo yimaada degaankiisa ay tahay in faraha laga qaado. Waa nidaam jira oo sharci ah; Ha ka walwalin taa.

Maxaa dhacaya markaad gaarto 18sano?

Waad joogi kartaa Talyaaniga haddii aad kasoo baxdo shuruudaha lagama maarmaanka u ah sharciga, sida barashada luuqada talyaaniga iyo in aad ilaaliso sharciga.



Foto: Jonathan Hyams / Save the Children

Maxaad samaynaysaa haddii aad khatar ku jirto ama qof uu faa'iidaysto ama uu ku xado?

Haddii Talyaaniga qasab laguugu keenay oo aadan raali ku aheyn soo galitaanka Talyaaniga, haddii laguugu hanjabay ama xadgudub laguugu sameeyay, haddii uu qof ku xakameynayo ama kaa dhigayo sida la heyste oo kale wax aadan rabina kugu qasbaya, uma baahnid inaad ka baqdo: waa lagu caawinayaa oo waxaa lagu geynayaa meel fiican oo caruurta lagu xafido oo amaan leh si lagaaga dheereeyo qofka dhibka kugu haya.



Foto: Jonathan Hyams / Save the Children

MA DOONEYSAA IN LAGU CAAWIYO?

Haddaba nala soo xiriir! 

HELP LINE Free Line
Numero Verde Numéro Gratuite **800 14 10 16**
المهاجرون الأطفال
Lycamobile **3512 20 20 16**

- CIVICO ZERO**
- Roma (0039) 347 2434799
 - Milano (0039) 345 0044255
 - Torino (0039) 342 9500858
 - Catania (0039) 392 2831798

Fax (0039) 091 8041062



Save the Children

CONOSCI I TUOI DIRITTI?

Ma taqaanaa xuquuqda aad leedahay?

Do you know your rights?

Connais-tu tes droits?

መስለትካ ትፈልጠምዱ?

از حقوق خود آگا مید؟

তোমার অধিকারগুলো কি জানো?



Save the Children



Progetto co-finanziato dall'Unione Europea



MINISTERO DELL'INTERNO

FONDO ASILO, MIGRAZIONE E INTEGRAZIONE (FAMI) 2014-2020

SO



Ma haysataa qof qoys ah oo Talyaaniga ama Yurubtan kale degen?

Waxaad aadi kartaa reerkaaga ama ehelkaaga oo ku nool Talyaaniga ama Yurubtan kale, iyadoo loo maraya nidaam sharciyeed. Noo sheeg oo waa muhiim in lagu caawiyo isla markaana lala xiriiro sida ugu dhaqsiiyaha badan. Waa muhiim in ay yihiin familkaaga/qaraabo dhab ah oo diyaar u ah isla markaana awoodi kara inay kaa taxadiraan. Haddii dhammaan shuruudahan ay kasoo baxaan, waxaad heli kartaa in aad si sharci ah aad familkaaga ugu biirto. Hawlgalku wuxuu qaadan karaa waqti, balse waxaad ugu dambeyntii ku biiri doontaa ama aad u wareegi doontaa familkaaga si nabadgelyo ah. Xitaa haddii aad horey u codsatay magangelyada Talyaaniga, waxaad weli xaq u leedahay inaad ku biirto familkaaga/qaraabadaada kale.

Marka aad weydiisan karto magangalyo caalami ah? Waa maxay magangalyo?

Haddii aad wadankaaga uga soo carartay dagaalo ama aad la kulantay tacadi, midib takoornimo, diintaada oo laguugu qabsado, dadka aad kasoo jeedo ama qabiilkaaga haddii la dhibaateynayo, haddii aad ka tirsan tahay qolo gaar ah ama aad heysato fikrad iyo siyaasad, isla markaana laguugu hanjabayo oo aadan xur aheyn, haddii wadankaaga aad uga soo tagtay dhibaatooyinkan oo dhan ama mid ka mid ah ay ku heysato waxaad xaq u leedahay ama weydiisan kartaa nabadgelyo caalami ah. Waad weydiisan kartaa magangalyo marka aad wadanka Talyaaniga timaado, ama waxaad weydiisan kartaa magangalyada marka lagu bedelo xeryaha caruurta ama kuwa (da'da yar ee 18sano). Waad weydiisan kartaa caawinaad, si aad luqadaada hooyo ugu hadasho, si aad uga warbixiso sababta aad wadankaaga uga soo carartay. Shaqsiyaad aqoon wanaagsan leh ayaa u xilsaaran howlaha magangelyada (Guddi caalami ah) ayaa ku dhageysan doona, iyaga ayaana qiimeyn doona codsigaaga magangalyo doonka ah. Waxaadna heli kartaa sharci, iyadoo la qiimeynaya xaaladaada.

